



## Ku Noqoshada muwaadin Maraykan ah Qaadashada Jinsiyadda

### Si aad ugu qalanto qaadashada jinsiyadda, waa in aad:

1. Noqotaa qof ugu yaraan 18 jir ah;
2. Tahay deggane rasmi ah oo sharci ah (LPR ama haysta kaadhka cagaaran) muddo shan sano ah (saddex sano haddii aad xaas Maraykan ah leedahay);
3. Aad lahayd degganaansho rasmi ah Maraykanka ee LPR shantii sano ee la soo dhaafay (saddex sano haddii aad xaas Maraykan ah leedahay);
4. Ku sugndyd waddanka Maraykanka ugu yaraan nus ka mid ah shanta sano (ama nus ka mid ah saddexda sano haddii Maraykan ah leedahay) ka hor intaadan dalban jinsiyadda;

5. Ku noolayd degmada USCIS ama gobolka oo aad ka codsanaysid ugu yaraan saddex bilood;
6. Gudubtaa imtixaanka ku hadalka, akhriska, iyo qorista Ingiriiska aasaasiga ah;\*
7. Gudubtaa imtixaanka ku saabsan taariikhda iyo dawladda Maraykanka;\*\*
8. Leedahay dabeecad wanaagsan, oo
9. Fahantaa oo aad aqbashaa dhaarta inaad daacad u tahay Maraykanka

\* Dadka qaarkood ma aha inay galaan imtixaanka Ingiriisida. Haddii aad tahay mid ka mid ah qaybaha hoose waxaad ku dhammaystiri kartaa waraysigaaga, iyo imtixaanka taariikhda iyo dawladda Maraykanka, luuqaddaada:

- Da'da 50 ama ka weyn ah oo ugu noolaa Maraykanka LPR ugu yaraan 20 sano;
- Da'da 55 ama ka weyn ah oo ugu noolaa Maraykanka LPR ugu yaraan 15 sano.
- Haddii aadan buuxin karin shardiga Ingiriisi sababtoo ah inaad qabto naafo caafimaad, waxa lagaa dayn karaa inaad imtixaanka Ingiriisiga gashid.

\*\* Dadka qaar ayaa laga yaabaa in loo oggolaan karaa inay galaan imtixaanka taariikhda iyo dawladda Maraykanka oo sahan:

- Da'da 65 ama ka weyn oo ugu noolaa Maraykanka LPR ugu yaraan 20 sano wakhtiga xeraynta, Dadka qaarkood looma baahna inay galaan imtixaanka taariikhda ama dawladda Mareykanka habayaraatee:
- Haddii aadan buuxin karin shardiga taariikhda ama dawladda Maraykanka sababtoo ah inaad qabto naafonimo caafimaad, waxa lagaa dayn karaa inaad gasho imtixaanka.

*Wax badan ka baro adiga oo booqanaya [iniclegal.org/citizenship](http://iniclegal.org/citizenship) Baro.*